

GOORMA AYUU MAQNAANSHU HU NOQDAA DHIB?

Maalin walba oo uu ilmahaagu ka maqnaado iskoolka, **wax ka badan 6 saacadood** oo wakhti waxbarasho ah ayaa ka lumaya.

Saaran Dhabbada Guusha
maqnaasho ah 9 maalmood
ama ka yar



0 1 2 3 4 5 6 7 8 9



Halis Qarka u Saaran
10 ilaa 17 maalmood

10 12 12 13 14 15 16 17

**Ka Dhacsan Dhabbaha
Qalinjebinta**
18 maalmood ama ka badan




18 19 20 21 22 23 24 25

XOG DHEERAAD AH



Sawirka kaamirada ku aaddi lambarka QR Code si aad u heshid kaaladarka degmada ama booqo spps.org/calendar.

Imaanshaha Iskoolku waa Muhiim (SAM)
Xafiiska Taageeridda Iskoolka

 651-767-8165

 spps.org/attendance

Kala xiriir iskoolkaaga wixii xog dheeraad ah ama iimayl ugu dir **Janine Huyer-DeVries** cinwaankan janine.huyer-devries@spps.org (waa ardayda ka yar 12 sano).



Xogaha ku jira buug-yarahan waxaa laga soo qaatay bogga la dhaho Attendance Works (imaanshaha iskoolka waa wax fiican) ee Attendanceworks.org.

SOO XAADIRIDDA ISKIOLKU WAA MUHIIM



Xafiiska Taageeridda Iskoolka
651-767-8165 • spps.org/attendance

SHARCIGA IMAANSHAHA

Markii laga diiwaangeliyo dugsiga dadweynaha, ilmaha da 'diisu u dhaxayso 5 jir ilaa 17 sano jir waa inuu helaa duruus ilaa iyo intuu ka qalin-jebinayo.

MAQNAANSHAHA CUDURDAARKA LEH

- ✓ **Jirro** (iskoolku wuxuu codsan karaa warqad caafimaad haddii ay jiraan 3 ama in ka badan oo maalmood oo jirro ah oo isku xigo, ama jirrooyin saa'id ah)
- ✓ **Fasaxyada Diinta**
- ✓ **Xaaladaha Arrimaha Degdegga ah ee Qoyska**
- ✓ **Ballamada Caafimaadka /Caafimaadka Dhimirka / Ilkaha**
(marka ay suurtoagal tahay, ballan qabso xilli ka baxsan saacadaha iskoolka oo ka dhig ballanta iskoolka ka hor ama ka dib)

MAQNAANSHAHA AAN CUDURDAARKA LAHAYN

- ✗ Safarka/Fasaxa
- ✗ Daalka shaqada/safarka
- ✗ Cimilada: Aad u Kulul/Aad u Qabow
- ✗ Ilmo la xannaanneenayo
- ✗ Dhibaato Dhanka Gaariga ah
- ✗ Baska oo kaa Tegay
- ✗ Hurdo lagu Daahay
- ✗ Tallaal La 'aan
- ✗ Guriga oo lagaaga Baahan yahay











MA OG TAHAY?

Laga billaabo iskoolka Preschool iyo Kindergarten, maqnaanshaha badan wuxuu sababi kara in carruurta ay dib ugu dhacaan waxbarashada.

Maqnaansho ah 10% ama qiyaastii 2 maalmood bil walba inta lagu jiro sannad-dugsiyeedka waxay ardayga ku adkeyn kartaa:

- Helidda xirfadaha akhriska hore iyo xisaabta
- Dhisidda xiriir wacan
- La imaanshaha caadooyin u aaddan soo xaadiriitaan fiican

WAXA AAD SAMEYN KARTO

-  La soo xiriir iskoolka wixii ku saabsan dhammaan maqnaanshaha.
-  Samee jadwal joogto ah oo xusayo xilliga seexashada iyo hawlaha subaxdii.
-  Sii diyaarso dharka iyo boorsada iskoolka habeenimada hore.
-  Hubsii in ilmahaagu qaatay tallaalada loo baahan yahay.
-  Bar carruurtaada macallimiintooda iyo asxaabtooda fasalka ka hor inta uusan billaaban iskoolku.
-  Dejiso qorshayaal arrimaha degdegga ah daboolo si aad u tegtid iskoolka haddii ay carqalad soo baxdo. Waco xubin qoyska ka mid ah, deriska, qof saaxiib ah ama waalid kale.
-  Isku day inaad ballan u qabsatid dhakhtarka, midka ilkaha, ballamaha daaweynta jirka, iyo safarada dhaadheerba marka uusan iskoolku furneyn.
-  Haddii ilmahaagu u muuqdo mid ka welwelsan inuu aado iskoolka ama uu muujinayo calaamadaha walaaca, la hadal macallimiinta, la-taliyayaasha iskoolka, shaqaalaha arrimaha bulshada ee iskoolka, iyo waaliddiinta kale si aad u heshid talo ku saabsan sida loo taageeri karo ilmahaaga.
-  Cusbooneysii xogta meesha lagaala soo xiriiri karo; lambarrada taleefanka, cinwaanka guriga, iimaylka.
-  Haddii aad u baahan tahay macluumaad, waxaad la xiriiri kartaa macallimiinta, la-taliyayaasha iskoolka, shaqaalaha arrimaha bulshada ee iskoolka, ama kalkaalisada caafimaadka ee iskoolka si aad u heshid caawinaad.